

Heestii Guddoon
By Dr. Abdirahman Beileh
Jan 03, 2009

This song (jiifto) is a message to the Somali Diaspora. It calls attention to what the author considers as an utter failure, on the part of the Somali Diaspora, with respect to sharing with those left behind, the fruits of the investment made in them by the nation. The success of any investment is judged by the magnitude of its return compared to the cost.

While it is recognized that, indeed, the Diaspora has been sending remunerations back home individually, it should be noted that sending money to one's own family is not sufficient to fulfill the national obligation which was the objective of educating them. Granted, families are important and they should be helped, but the truck drivers, the taxi drivers and Joe-the-plumbers outside the lands of the Somalis are also sending money back home. So, where is your difference folks? Those who have been educated by the nation should go beyond feeding their families. The investment return was to be in the manner of creating a good citizenship, taking a lead role in the policy direction of the nation, intellectual contribution and leadership, and not necessarily sending money back alone. This was national investment and the return has to be to the nation.

From the foregoing arises a very serious question: Can an "educated" Somali hold and openly express a consistent national view on current issues even when such a view may deviate from his/her clan's collective and mostly myopic conjecture? In fact, this can be a good dissertation topic for you young Somali students doing PhDs: (Sociology, Education, Anthropology, Political Science, etc). Get funding and do it. I will even volunteer to review your work: Here it is:

1. **Null hypothesis: Ho:** The level of education (high school, Bachelors, Masters, PhDs etc) makes no difference in the way the individual Somali is affiliated with and biased towards the collective view of his/her clan:
2. **Hypothesis: H1.** (alternative): Yes it does.
3. You will take a random sample of a large enough number of educated Somalis, and use it as the experimental group. You will also take another sample of equal number from their uneducated counterparts and use it as the control group.
4. All else being equal, you will reject the **null hypothesis** if you find significant difference in how the two groups respond to a carefully crafted questionnaire related to various aspects of the Somali clan system. I have my own views on this. But would not wish to preempt the outcome of the study.

Dr. Ali Bahar, who is in the dialogue in the jiifto is a colleague of mine who inspired me with his own Jiifto (Jamaad). Jamaad speaks about the land of the Somalis and the difficulties and

desperation that it has been subjected to over the last 18 years or so. It cries for help and an intellectual leadership from non other than the educated Diaspora.

The name “GEB” is the name of one of those ouadis (dry rivers) that originates from Buur Madow and pours to the red sea down towards Lughaya. The community in the area is used as an example, but it most certainly speaks for thousands of similarly desperate communities languishing across the lands of the Somalis for the last 20 years.

Here is Guddoon by Dr. Beileh
October 21, 2008

Caliyow gabaygii
Gudbantii xardhanayd
Gabadhii xamranayd
Geenyaddi shaalka lahayd
Ku gaafnayd sumaddaadu
Na soo gaadhdhay hadeerto
Xigmadday guntaneydiyo*
Kaa guddoonnay Jamaad
Ubaxbaanu u gaynnay
Geed hadhaan u yegleelay
Inan gaari ah weeyi
Gobtii weeyi haween,
Dumar wey ku gudheen
Garaad bay huwantay
Timaha ay gadafaysey
Socodka gaatin dhaqaaqa
Sida geenyo hubaysan
markay gees u dhaqaaqdo
Indhuhu way ku gam'aan
Gacmahaa qalanjeysan
Dhexda aad guntin mooddo
Indha guulle hadheeyey
ku gadaamay jacaylka
Qoorta aad geri mooddo
Cabbaadhyaha ku gulaalan
In kaloo garabtaal oo
Sifa gaar ah u baahan
Qof u Guulle abuurayoo
Garabkeeda istaaga
Geyigeenna ma joogto

Inantu waa gacalkeen
Geyaan heedhe mutaystiyoo
Geesi baan la rabaa
Waxay sheekadu gaadhay

Reerihii garabkeenee
Agagaarka Gebeed
Gammaankii, lacagtii iyo
Geel bay soo dumayaan
Geedkay no fadhiyaan

Afartaa gogoshii iyo
Gunnihii ku tilmaan
Geed maraaya ku sheeg
Gunbay sheekadu leedee
Adigaa garandoona

Gabay aan ku tirabo
Geerar, hees iyo jiifto
Gole aan la'imaaddo
Galabtaa u horreeysa
Halkeedi lama gaadhin
Goorteedii weli maaha
Geeljiraan ku habsaamay

Caawaaan gaydhanayaa
Gowsahaan lisayaa
Gabay aan u badheedhiyo
Gartaydaan sugayaa
Gaddaafaan ridayaa
Rag niki leh garaadow
Gariirkiisiyo xooggu
Lugaha yaanu ku goynne
Gees adeer uga leexo

Marnaa gaaxda ka maal
Godol-qaadday ilays
Kaalay gaawaha buuxso
Gaajo waa saxariir e
Gorofkaaga callayso

Geesi miidho dareemay
Doqon kaa gedoweyn Oo
Guudka loo fidhay waayo
Maray doonto ha gaadhee
Geesahay is darayaan

Gucundhaalaha aaroo

Intay gaajo ku raagtay
Gasiin meel ka arkooday
Degdeg buu is ganaa
Ilkaha is galiyaa oo
hawlihiisa gutaa

Gobi way tashataa
Hoosta geedka tagtaa
Gorfeysaa taladeeda
Sahankii gelbisaa
Warka ay ka gurta
Markaasay geeddi rarta
Ku guurtaa maleheeda

Garaadkeedu ma buurnee
Gunina way duryantaa
Garteeday dhabqisaa
Gaagaxadaa boqol jeer
Hadal gees u u jeedo
Iyo gees u ka jeedo
Midna aad garaweydiyo
Guuraabaaska ma deyso
Dhinacana kuu lama guurto
Gaafahay marmartaa
Dagaal ay mar galeen
Sidii loogu go'doomay
Markasaan wax gumaadnay
Hebel baan kala goynney
Ayey guul ka dhigtaa
Geeraar dheer tirisaa
Doqoneey gabbalkaa dhac

Galab baan soconnaa
Ammin waan gabyaya
Guullana waan filaayaa
Gun bay sheekadu leedee
Adigaa garan doona

Afartaa gogoshii iyo
Geedi dheer ku tilmaan
God kalaan arakyaa
Degdeg aan ugu guuro
Geblo aynu ciyaarree

Iska giiji dhankaga
Safar baan geleyaaye
Sahaydu yey igu gaaban

Geyigii Cali soo warsaday
Anna an sheekada ka guray
Gebbaan beri dhaw ka imi
Dhambbaal gaar aan sidaa
Intii naga goosantiyo
Dadkii naga guuray beri
In ay bal garawsadaan
Gadaal wax u soo dhugtaan
soco la' yidhi u gee
Haddaad hadal iga gurtaan
Anaa soo gebegebeyn
Gunteeda anaa ku siin
Go'aanka adaa iska leh

Geb baa waxay tidhi Calow

Haddaan dhinac kale u goosho
Haddaan gees kale abbaaro
Wixii keliday i gaadhay
Wixii gubay feedhahayga
Galiilyo waxaan muquurtay
Waxaan hurdo gam'a u diiday
Intaan gole kula fadhiisto
Haddaan gaar wax kuugu sheego
Haddaan gooni kuu waraysto
Haddaan geedka kaaga baano
Haadaan gar ilaah taqaanna
Run aan gabbanaynin sheego
Bartaa gobo' kaaga siiyo
Anoon cidna eed u geysan
Inaan talo goobta taalla
War gaaban idiin tibaaxo
Ayaan taladeeda gaadhay
Haddaad gudan waajibkaaga
Haddaad geesaha ka dhaafi
Haddaad igu gani fallaadho
Wixii talo kula gudbooni
Aday kuu tahay guddoon
Gaadhsiintuna waa xilkayga

Adina waa garashaada
Sidaad doonto u garooco

Waxay Gebi tidhi Calow:

Gaaroodi haddaad degteen,
Haddaad Kanadiyo gasheen
Dhul aan cidi gaadhi karin
Maraykan guntii tagteen
Haddaad gooshteen hawada
Haddaad gudubteen badaha
Haddaad afagaalle iyo
Daruuraha geesmardeen
Samada waxa u gaar ah iyo
Haddaad giganaha korteen
Haddaad garangoorridii
Intaad goyseen faqriga
Gabaarreydii tirteen
Garaaddo iskugu tosheen
Haddii laba gaadhi iyo
Dhexdood labadiinnaa guri
Haasaawe gobeedka iyo
Habeenka ku gaabsataan
Haddii galbatiinu tahay
Inaad filimada gashaan
Haddii gama'iinnu yahay
Si aad gudateen xajkii
Xareed galaclaysa iyo
Haddii gu' idiin onkoday
Galshiyo ceel wada daf yahay
Barwaaqadan aan gudhayn
Hashani aan gaagaxayn
Nimcadan aan gamashiyeyn
Haddii rabbi kugu galladay
Qabsoo ina gaban-warroow
Galabeed warar baa ka yimid
Galiilyio dhiillo wada
Xasuus geyigaad ka timi
Inaad garataa la rabay
Dar baa gaajiyo harraad
Habeen ugu soo galaa
Ayaamo afkood wax gelin
Dar baan hurddo gaw ka siin
Darbaa weelkii gambiyey
Gargoor iyo caws huwada

Intay gosha soo rogteen
Qabriga wada guud fadhiya
Geerida ku sugaaya ciil

Ogoow ina gabanwarroow
Aada dugsiyada u galay
Gedday kugu soo korsheen
Siday garab kuu tareen
Adoon waxaba garanahyn
Siday gosha kuu riteen
Magaalo ku soo gesheen
Dartaa ugu gologoleen
Intay weysa ina giir
Sabeenaha kuu gadeen
Adiga gaar kuu hayeen
Abaalkii ay kuu galeen
Inaad gumatay ahayd
Garaad ku waday ahayd
Saceennii ina golmadhan
Haddii jilaal u galay
Geed iyo baad wada qallaly
Goofaadhiga weysa iyo
Gasiin kuma wada fillee
Maxaad qorofka uga culan
Intay isqabsataan gacmaha
Inaad geediga rartaan
Inaad guryosamo furtaan
Guddoon dhaha oo aqbala
Galliilyoodoo ka kaca
Gayiga ma cid baa u maqan
Adduun waa labada gelin
Hadhkaa hadba geesta jira
Allaa garan sahandambee
Aada gacan maanta sare
Gargaar wax ku toosin kara
Aada geel doojin kara
Aada garashiyo aqoon
Intaba lagu soo geshoo
Aada gar fadhiisan kara
Aada waxa kugu gafka ah
Dunida la gorfeyni kara
Aada ninka kaa gar daran
Ninkaa gurigaaga shiday
Ninkaa olloggaaga gubay
Maxaakimta geysankara
Gartaada habaysan kara

Gacmuhu is-kalkaashibay
Ogow wax ku goyn karaan
Gilgilo oo sara kacoo
Aduu garabkayga noqo
Guushana rabbi baa iska leh

Waxay Gebi tidhi Calow:

Midhaha geed sare ku yaal
Qodaxi ku gadaamantahay
Haddii aanan goosan karin
Ninki gaadhaa iska leh
Anigu sowtaan gedmedey
Godkiyo sowniga dul'aal
Adowgey halkuu ku go'ay
Bankii ina geeriyaad

Maxaa duni lagu lugo'ay
Maxaa dumar wada goblamy
Arsaaqad maxaa gembian
Maxaa gabbal reer u dumay
Maxaa geel madi lahaa
Maxaa gommodaha la jaray
Maxaa gedac wiil ahaa
Gaashaan iyo wehel ahaa
Cadaawuhu geedka sudhay
Maxaa gabadho iga firdhaday
Maxaa geyi iga burburay
Gaashaan inay ii noqdaan
Inay gacanta i qabtaan
Gargaarka kuwaan ka rabay
Markii garanwaa i helay
Hadday gumuc iyo rasaas
Gaalleef ila boobayaal
Haddaan iska giijiyoon
Dagaal guntiga u xidhiyo
Haddaan goradda u dhigtaba
Kollay goblan way ag yaal
Anaa labadaba u go'ay

Badhkay gudun uu ku jiro
Ninkii ila gaadayoow
Heddaydii weli ma gu'in
Garaadkii weli ma lumin
Ishaan galacallynayio
Sidaan u gamaarsanahay

Dan baan isla gaabiyaa
Go'baa iga jeexamay faraq
Dawaarre la goobaaya

Intaan gudahayga iyo
Guntayda ku eeddana
Miyey geed igu xidheen
Kobtay ila gaadayeen
Guudkayga waxy rareen
Waxay gibil igu tiseen
Miyuu xadhiggii i gubay
Guradu I dalooshantahay
Gunaadku i heemayaa
Maxay garangoorri iyo
Gabbaarrey igu korsheen

Wellee ina gilingiloow
Dhibtaad ii geysatiyo
Maxaan godob kuu hayaa
Guyaal iga baaba'ayn
Falaad igu gaaxday iyo
Maxay cadhadu i gubtaa
Galiilyo i baatushaa
Naftaydu haddaanay gu'in
Haddaan godka la'igu ridin
Waxaan nidar kuugu galay
Anaa hawshayda gudan
Wixii guunyo iga burburay
Wixii geyi iga jirfaday
Wixii gabadho iga firxaday
Taariikhday ii galeen
Anaa beri hore guntaday
Raadkodaan goobayaa
Anaa gashigeyga beden
Inaan gilgishaan rabaa
Gaddaafu dhigaan rabaa
Guushayda hantaan rabaa
Carruurahan dibad-galka ah
Dugsiga geeystaan rabaa
Dantayda gartaan rabaa
Aada ila garan tasmada

Walaashay gacalisoooy
Anaa kuu garaabayee

Raggii gabdhaw baa ku dhacay
Waxaan garanwaayey iyo
Garaabiidiyo xanuun
Intaa wey goohayaan
Habeen gellinkiisa dhexe
Ilaa galabtiyo barqada
Gidaarbay yuururaan
Afkay wax la goobayaan
Garaabay diirayaan
Geed baas bay dhilanayaan (Jaad)
Intay soo wada goteen
Balaayey gaadayaan
Cumaamad u gaara iyo
Go'ii iyo macawistii
Geddi raga lagu yiqiin
Intay guntigii fureen
Geestaa u maguujiiyeeyn
Dar baa googorado iyo
Gambbiyo ku marriiman diric
Cidlay gegeedoomayaan
Guryihii wey dayriyeen
Carruur uma gogol hayaan
Si ay xabbadda u gurtaan
Si ay guryaha u dhacaan
Shicibka kala gaabiyaan
Walaalkood gaasiraan
Gambaa lagu iibsadaa
Geyiga adigaa u hadhay
Ilaahaa garab ka filo
Guulaysta walaalayaal

An soo gaabshee murtida
Gunaandka heesta iyo
Waxay gogosheedu tahay
Inaad gacma laabataan
Gutaata-dhac seextaan
Taariikhda idiin galaan
Inaad gurmada soo dirtaan
Taageero cad gaysataan
Gar baan kuugu leeyehee
Mid uun labadaasi gala

Miyaan gabadh iyo raggeen
Haddeer wacad wada galnaa?

Miyaan guul raadinaa?
Gambada inna saaran iyo
Dulliga inna guud fadhiya
Miyaan giddigood tirnaa?
Miyaan guri wada dhisnaa?
Galool ma ku daahanaa?
Garaad ma ku meel marnaa?
Gacmaha ma'ishaysanaa?

Haddaan giddigeen xoroownay
Haddaan gobanimo haleelnay
Haddaan calan guudka saarnay
Haddaan geblada u ciyaarnay
Haddaan gegeda uga boodnay
Haddaan wilwilaha u goynay
Maxaa dib innoo gawaanshay?
Gadaal bal maxayga yaalla?
Maxaa gorofkeenna laalay?
Maxaa fikirkeenna gaabshay?
Sirtii gudeheenna taallay
Maxaa dibadaha ku gaacshay?
Cadaawe maxaa u geeyey?
Ilaa goor iyo habeenka
Gunaadkiyo dhaawaceenna
Guudkeenniyo hoolifteenna
Wixii dibindaabyo gaadhdhay
Ilmada naga gobo'tamaysa
Garawsho maxaan u waayey?
Inaan gacan hiillo yeesho
Maxay dunidu uga giigtay?
Maxay ii gooniyaysay?
Maxay gees iigu oodday?
Qaxooti maxaa i geeyey?
Maxaa sharftii gulaalay?
Maxaa nabaddeena gowlay?
Maxaa fongoraha u yeelay?
Maxaa geed sare ku laalay?
Maxaa geyigeena hooyo?
Go'doonka maxaa ka yeelay?
Maxaan ubadkeena goosmay
Carruuraha dibad galoobay
Iskuullo u geysanweyney?
Maxaa gaajo inna saary?
Wixii dalag naga gafoobay

Gallayda miyaan ku beerno
Geed gaab ku aburno daagga
Geddi beer lagu yaqaanay
Intaan guus xoogan saarno
Cawskiyo haramaha ka goynno
Gunfida ka sifaynno boyga
Intaan gacafkeena qaadno
Garraaxadiyo faracaddeeda
Miyaan garawga iyo heedda
Gu' iyo dayr wada fajaasno?
Xasiid ku galaa-butaynno?
Intaan giddislay abloollo
Intaan gego weyn habeynno
Miyaan geeliyo lo'deenna
Goolkeena iyo awrka naaxay
Wankayga glaalan keenno?
Ninkii raba guunyadeena
Inuu hilibkeeda goosto
Inuu badaha ula goosho
Galaan iyo daasaddiiba
Miyaan giniyaad ku miisno?
Goobtaa Rabbi nagu abuuray
Geeskaa Afrikeen ku naallo
Galbeed iyo bari dhexdooda
Miyaan godolkooda maalnno?
Miyaan ganacsi u dhaqaaqno
Sidaa dayaxa ugu guurno?

Dhurwaagii daba gammuure
Hadduu kala gaabshay xoolo
Hadduu maqashii gumaaday
Maxaa gacamahayna laaby
Maxaa gibilka inna saaray
Miyaan dibigeenna giirre
Intaan geesaha u fiiqnno
Intuu soo gaarufaysto
Intuu soo gadood-abrraaro
Laba-u-kala goo nidhaahnno
Qofkii soo garab istaaga
Digniinta Garwaaqsan waaya
Gaalleftiyo toorrideena
Intaan golxadkeena boobno
Sidii good iyo abeeso
Intaan gawnaxa u buurno
Intaan "Gii" wada nidhaahno
Miyaan gawrac ugu jiidnno

Unuunka miyaan ka goynno
Qofkii gar innoo fadhiista
Ninkii godob noogu baana
Miyaan gashigiisa siinno
Wuxuu beelaha u geystay
Miyaan kaga gam'ano taasi

Haddaan isla garannay jiipta
Guddoon dhaha waanadayda
Gadaal uma laabmi doonno
Talaa gondaheena taalla
Garaad baa la inna biday
Geedkiyo waa innoo hadhkiisa

Abdirhaman Beileh
beileh2110@yahoo.com

** (macawis baan guntanahay not waxbaa ii guntan*